Habka Ku Saleysan Aagga: Qeexitaan, Sumadaha Muhiimka Ah Iyo Faa'iidooyinka

Habka ku saleysan aagga: Habka qeexaya aag, halkii uu qeexi laha waax ama koox bartilmaameed ah, inay tahay barta ugu weyn ee laga soo galo. Dhammaan daneeyayaasha, adeegyada iyo baahiyaha waa la tirokoobaa oo la qiimeeyaa, isla markaana ururada hawl wadeenada ay khusayso la abaabulaa oo lala shaqeeyaa. (IRC

1. Mabaadi'da lagu dabaqo hababka ku saleysan aagga

- **Diirada saar goobta:** qorshaynta aaggu ku saleysan waxay u isticmaashaa aag / goob juquraafi inay noqto meesha ugu weyn ee laga soo galo. Aagga 'laga hirgelinayo qaabka ku saleysan aagga waxaa lagu go'aamin karaa iyadoo lagu saleynayo dhowr arrimood
    - Isku darka dadka ku nool aaggan (xaaladda barakaca iyo arrimo kale oo kala duwanaansha)
    - Heerka nuglaanta ka dhex jirta bulshooyinka uu barakacu saameeyey guud ahaan
    - Jiritaanka u nuglaanta barakaca gaarka ah
    - Jiritaanka, ama suurtagalnimada, qorshayn aag oo maxali ahaan loo leeyahay
    - Jiritaanka meel maamul dowladeed ka jira, ama ay ka muuqato jawiga magaalo, taasoo iyaduna kobcin karta dareen aqoonsi bulshadeed
- Ficil ahaan tani waxay ka kooban tahay:
    - *Dadaal wadajir ah oo ay wada wadaan ururada hawlwadeenada kala duwan oo lagu ogaanayo goobta saxda ah / aagga leh hoggaanka mas'uuliyiinta dowladda, iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka qiimeynta hay'adaha badan / qaybo badan si loo aqoonsado heerarka baahida ama u nuglaanta dadka ay barakacyadu saameeyeen.*
    - *Tixgelinnada wadajirka bulshada ayaa sidoo kale muhiim ah marka la dooranayo ballaarka uu noqon karo aaga juqraafi ahaan. Cashar muhiim ah oo laga bartay barnaamijka UNDP ee ku saleysan aagga ayaa ah in 'beegsashada aagga ballaaran, bedalka aaga yar laga yaabaa inay u dhowdahay inay yareyso xiisada ka dhex aloosan bulshada deriska ah. Waxa kale oo ay suurtagelin kartaa hab isu keena bulshooyin juqraafiyeed oo kala duwan iyo dhisida xiriir wanaagsan oo dhexmara '*
    - *Muhim ah in falanqeeyo kala duwanaanshaha dhaqaalaha ee gudaha miyiga iyo magaalooyinka - waa muhiim in la tixgeliyo kala duwanaanshahan wakhtiga barnaamijyada la jaangoynayo tusaale ahaan sida awoodaha dhaqaale ee magaalooyinka ay saameeyaan barakaca / qulqulka haajirka ka yimaada miyiga? Sidee socodka dhaqaale ugu xiraa aag gaar ah kuwa kale?*

- **Habka Hay'adaha badan, saktarada badan ka kooban**: si wax looga qabto baahiyo kala duwan ayadoo laqaadanayo waxyaabo badanoo isku duuban oo ah ujeedooyin bulsho, dhaqaale iyo jireed, bani'aadamnimo iyo horumar**.**
    - Habka Hay'adaha badan, sakatarada badan ka kooban waa inuu diiradda saaraa ka faa'iideysiga khibradda ururada hawlwadeenada kala duwan ee jooga aagga dhexdiisa oo laga wada shaqeeyaa aragti guud / natiijo wadajir ah
    - Arrin muhiim ah oo ku saabsan tan ayaa ah sida loo dhiso is dhexgal ku saleysan khibradaha kala duwan iyo in la hubiyo in hay'adaha kala duwan ee ku lug leh habka qorshaynta aagga ku salaysan wada shaqeyn iyo xiriir dhow yeeshaan.

DRAFT

- **Mudada Waqtiyada dhabta ah:** waa in diirada la saaraa natiijooyinka muddada-dhexe ilaa kuwa muddada fog halkii laga wajihi lahaa muddada gaaban ee qorsheynta sanadlaha ah, dejinta miisaaniyadda iyo wareegyada fulinta.

- **Qorsheynta iyo tilaabooyinka dadka-ku-saleysan:** iyadoo xoogga la saarayo bulshada iyo ka-qaybgalka daneeyayaasha ballaaran si loo aqoonsado xalalka suurtagalka ah, iyo lug-ku-lahaanshaha firfircoon ee maamullada maxalliga ah.
  Habka dadka-ku-saleysan wuxuu ka kooban yahay:
  - Ka mid noqoshada bulshooyinka barakacyaasha iyo kuwa martida loo yahay ee bilowga geedi socodka qorshaynta loona ogolaado inay dejiyaan mudnaantooda isla markaana wadaagaan caqabadaha iyo soo jeedimaha
  - Qaadashada hab wadatashi, habsami u socodsiin iyo qaadashada waqti si macno leh oo lagu dhageysto dadka ay dhibaatadu saameysey
  - Taageerida barashada asxaabta kooxaha bulshada
  - Dhiirrigelinta milicsiga xilliyeed ee xubnaha bulshada ay ku sameynayaan qorshe hawleedyada bulshada
  - Ka qaybgelinta haweenka iyo dhalinyarada - hubinta inay si dhow ugu lug leeyihiin qorshaynta iyo maaraynta isbedelka
  - Adeegsiga aaladaha kaqeybqaadashada balaaran tusaale PfIM, qorshe hawleedka bulshada MIDNIMO meelkastoo ay suurta gal ka tahay loona dabacsanaado la qabsiga barnaamijyada horumaraya iyadoo la raacayo isbedelka mudnaanta dadka uu saameyey barakaca.
- **Ka shaqee oo maal-geli qaab-dhismeedka jira:** hoggaaminta qorshaynta ku saleysan aagga waxay u baahan tahay in laga dhigo maxali iyadoo ururada caalamiga ah ay ciyaarayaan door taageero. Qorsheynta / habab ku saleysan aagga waa inay tixgeliyaan maal-gashiga jira iyo awoodaha maxalliga ah. Barashada muhiimka ah ee laga dhaxlay barnaamijka 'RE-INTEG' ee Soomaaliya waxay ahayd: Qaabdhismeedyada bulshada, awoodaha iyo dhaqdhaqaayada awoodeed ee jira waa in lagu muujiyaa/dabaqaa marka la bilowayo barnaamijyada diirada saara xallinta islamarkaana aan la abuurin kooxo bulsho oo cusub hadii aynan buuxinayn meelo banaan oo aynan soo kordhinayn qiime weyn.

Ficil ahaan tani waxay ka kooban tahay:

- *Qorsheynta wadajirka ah ee lala yeelanayo mas'uuliyiinta kala* duwan (heer qaran, heer gobol / heer degmo/caasimad) - tani waxaa lagu la hubinayaa in la waafaqo qorshooyinka jira ee ku saleysan aagga ee deegaanka leeyahay. Maqnaanshaha kuwan, barnaamijyada ku saleysan aagga waa inay gacan ka geystaan / taageeraan horumarkooda
- *Waqti galinta si loo fahmo dhaq dhaqaaqa jira iyo qaabdhismeedyada / geedi socodka siyaasada ama sharci dejinta*

- **Wada shaqeynta saktarada iyo barnaamijyada:** Wada shaqeynta saktarada waa lama huraan si loo helo falcelin isku xiran oo mideysan isla markaana gacan looga geysto aragti guud oo ku saabsan xalalka waara. Tani waxay si gaar ah run ugu tahay duruufaha barakaca ee magaalada, halkaasoo ay

DRAFT

ka jiraan baahiyo adag oo isdul saaran iyo u nuglaansho u dhexeeysa barakacayaasha iyo saboolka magaalooyinka.

- Barashada muhiimka ah ee laga dhaxlay barnaamijyada kaladuwan ee ku saleysan aagga waxay *ahayd baahida loo qabo in la soo saaro, la fuliyo lana taageero habab hay'addeed si macluumaad wax ku ool ah ay u qulqulaan iyo iskuduwid* u dhexeeysa ururada hawlwadeenada iyo qaybaha kala duwan.
- Habka wax ku oolka ah ee ku saleysan aagga wuxuu ku tiirsan yahay hubinta is-dhameystirka hawlaha ururada hawlwadeenada iyo kuwa kale iyo barnaamijyada ka jira aag juqraafiyeedka la doortay

- **Barnaamij dejin debecsan: Maareyn la-qabsi leh:** hab barnaamij dejin oo isku daraya falanqeyn habboon, dabacsanaan qaabeysan iyo hagaajin joogto ah ayadoo ay jiraan xaalado adaag oo kajira deeganka

- **Nidaamyada gudaha ee fudud degdegana ah:** habab ku saleysan aagga waxay u baahan yihiin ururo hawlwadeeno iyo nidaamyadooda inay la jaanqaadaan dhibaatooyinka iyo baahiyaha bulshada uu saameyey barakaca

  Qorsheso kor-u-qaadid: habab ku saleysan aag ayaa lagu balaarin karaa aagag kale, taas oo xoogga saareysa baahida loo qabo lahaanshaha maxalliga ah.
- **Cabbiro wax ku biirinta oo ha cabiran nisbiyeyn:** astaamaha ugu muhiimsan ee habka aaggu ku saleysan yahay waa ka faa'iideysiga khibradda ururada hawlwadeenada kala duwan ee ku sugan goob deegaaneed oo ku wajahan natiijo wadajirka ah.

2. 2. Faa'iidooyinka Muhiimka uu leeyahay habka ku saleysan aagga [1]

Cilmi baaris ay sameysay Kooxda ka shaqeysa Dejinta Degmooyinka Magalada ayaa muujineysa in habka dejinta ay ka faa'iideysan karaan dadka ay saameyntu gaartay, daneeyayaasha maxalliga ah, iyo hay'adaha samafalka ee taageeraya.

Habkan dejint ah ayaa waxtar u leh dadka ay dhibaatadu saameysey:

- Waxay yareysaa abuurista ama xoojinta xiisadaha iyo sinaan la'aanta waxayna gacan ka geysaneysaa hagaajinta wadajirka bulshada.
- Waxay abuurtaa ka falcelin wada jir ah oo wax ka qabanaysa baahiyaha xad dhaafka ah.
- Hubinaysaa inaan la dhaafin cid saameyn leh ama bulshooyinka ay waxyeeladu gaartay.
- Wax ka qabanaysaa baahiyaha kooxaha ay dhibaatadu saameysey ee ku kala baahsan qaybaha kala duwan iyo dadweynaha

Waxaa kale oo ka faa'iideystaa daneeyayaasha maxalliga ah:

- Wuxuu la shaqeeyaa nidaamyada maamul ee jira.
- Wuxuu soo dhoweeyaa aragtiyada saktarada badan ee daneeyayaasha badan ee ay maamullada deegaanku u baahan yihiin.

[1] Excerpt from The Settlement Approach Guidance Note, Reach, 2020.

DRAFT

- Waxay xoojineysaa awooda ururada maxalliga ah inay wax ka qabtaan baahiyaha badan ee la xiriira dhibaatooyinka bani'aadamnimada.
- Waxay dhiirrigelisaa dhex-dhexaadnimada, eex la'aanta, islamarakaana isu dheelitiraa u tartanta arrimaha la xiriira ka ka fal celinta dhibaatooyinka, sidaas awgeedna waxay wanaajisaa is aaminaada ka dhexeysa daneeyayaasha.
- Waxay wanaajisaa xiriirka ka dhexeeya bulshada iyo dawladaha hoose.

Qaabka dejinta ayaa sidoo kale waxtar u leh hay'adaha samafalka:

- Waxay ogolaaneysaa in kheyraadka si wanaagsan loo isu geeyo loona qoondeeyo degsiimooyinka ugu saameynta badan.
- Waxay kheyraadka diirada ku saartaa mudnaanta baahida bulshada.
- Waxay xoojisaa hufnaanta iyo fahamka sida ugu wanaagsan ee looga bixin karo kaalmo dhinacyo badan leh heer maxalli ah.
- Waxay hagaajineysaa xiriirka iyo is-dhameystirka wada-hawlgalayaasha, oo ay ku jiraan kuwa samafalka bini adanimo iyo kuwa horumarka ka shaqeeya iyo daneeyayaasha maxalliga ah.
- Waxay awood u siineysaa la-qabsi degdeg ah oo dhinaca baahiyaha isbeddelaya ah iyadoo la abuurayo saldhig macluumaad oo taageera barnaamij fulin ku saleysan xaqiiqada.
- Waxay rajeyneysaa wadiiqooyinka waxqabadyada soo kabashada ee dhinacyada badan leh

DRAFT